



HM Government

**NHS**

Test and Trace

# Hagahaaga tallaabo- tallaabo ah ee baaritaanka iskaa ah ee COVID-19



**Si taxaddar leh u akhri hagahan dhammaantiis kahor intaadan bilaabin baaritaanka.**

Hagahan wuxuu sharaxayaa sida aad isu baari lahayd ama aad qof kale ka baari lahayd coronavirus (COVID-19), oo aad natiijooyinka ugu gudbiso NHS.

Caawimaad dheeraad ah ka hel [www.gov.uk/covid19-self-test-help](https://www.gov.uk/covid19-self-test-help) oo ay kujiran fiidyowyaasha sharaxaadda iyo tilmaamaha luqqadaha kale.

# Ku saabsan baaritaankan

**Dad badan oo qaba coronavirus (COVID-19) waxay leeyihiin astaamo khafiif, ama xitaa malahan astaamo, laakiin wali way faafin karaan fayraska. Is-baarista joogtada ah waxaan ku yareyn karnaa faafitaanka oo waxaan ilaalin karnaa kuwa ugu nugul qoysaskeena iyo bulshooyinka.**

Waaxda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada (Department of Health and Social Care) (DHSC) COVID-19 Baaritaan Iskaa ah (Rapid Antigen Test) waa baaris suuf ah si loo ogaado coronavirus oo la gudbin karo (COVID-19).

**Inta jeer ee ay tahay inaad baaritaan isku samaysid way kala duwanaan kartaa iyadoo ku xiran duruufahaaga iyo tilmaamaha hadda jira ee qaranka ama deegaanka.**

## Baaritaankani waxay ku habboon tahay dadka soo socda:

**Dadka waaweyn ee jira 18+:** Baaritaanka-shakhsiyeed iyo warbixinta, oo leh caawimaad haddii loo baahdo.

**Dhallinyarada ee da'doodu tahay 12 – 17:** Is baar oo ka warbixi iyadoo uu ku ilaaliyo qof weyni. Qofka weyn ayaa qaban kara baaritaanka marka loo baahdo.

**Carruurta ka yar 12 sanno:** Carruurta ka yar da'da 12 sanno waa in uu baaritaanka ka qaado qof weyni. **Baaritaankan ha qabanin haddii aadan ku kalsooni qabin in aad baaritaan ka qaaddo ilme.** Ha sii wadin baaritaanka oo jooji haddii ilmuhu xanuun dareemo.

**Fadlan eeg bogga 11 si aad u hesho tilmaamo ku saabsan sida loo baaro ilmaha.**

### Hagaha iyo caawimaad Coronavirus (COVID-19)

Haddii aad leedahay calaamadaha coronavirus (COVID-19) ama aad qaadday coronavirus (COVID-19), fadlan eeg hagaha internetka ee NHS: [www.nhs.uk/conditions/coronavirus-COVID-19](http://www.nhs.uk/conditions/coronavirus-COVID-19)

Haddii aad leedahay astaamaha coronavirus (COVID-19) oo xaaladdaadu ka sii darto, ama aad ka soo rayn weydo 7 maalmood ka dib, isticmaal NHS **111** adeega internetka ee coronavirus [www.111.nhs.uk](http://www.111.nhs.uk). Haddii aadan haysan khad internet, wac NHS **111**. Haddii ay jirto xaalad deg deg ah ee caafimaad wac **999**.

**Haka daahin helida caawimaada haddii aad walwalsan tahay. Ku kalsoonow dareenkaaga.**

## Hagista guud iyo digniinta

Qof walba u adeegso xirmo baaritaan oo gaar ah. Waxaad u isticmaali kartaa shay kasta xirmada baaritaanka hal mar oo kaliya. Dib ha u isticmaalin walxaha. Waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbisid qof walba natiijadiisa.

Haddii aad dhibaatooyin ku qabtid gacmahaaga ama araggaaga, waxaad u baahan kartaa qof kaa caawiya marinta suufka iyo habka baaritaanka.

Haddii ay sanku ku duran tahay suuf mari sanku kale. Haddii ay labada ku duran yihiin, mid kamid ah giraanta iska bixi intaadan suufka marin.

Haddii aad sangoror lahayd 24kii saac ee la soo dhaafay, suufka mari sanku kale ama sug 24 saacadood.

Ha cunin hana cabin ugu yaraan 30 daqiiqo ka hor baaritaanka si aad u yareeyso halista in baaritaanka uu xumaado.

Qalabyadan waxaa loogu talagalay oo keliya isticmaalka aadanaha.

**Adigoo si taxaddar leh u raacaya tilmaamahan, waxaad hubin doontaa in la gaaro natiijo la isku halleyn karo.**



**Haddii ay jirto sabab aanad u qaadan karin baaritaanka suuf marinta cunaha, tusaale ahaan waxaad gashay qalliin cunaha, bedelkeed waxaad suuf marin kartaa labada duleel ee sanku.**

# Waxaad u baahan tahay inaad sameyso

Aad ayey muhiim u tahay inaad akhriso tilmaamaha oo aad raacdo talaabooyinka sida saxda ah. **Baaritaan kasta wuxuu qaadan doonaa ilaa 15 daqiiqo in lasoo diyaariyo natiijooyinkuna waxay diyaar noqon doonaan 30 daqiiqo oo dheeraad ah ka dib.**

1	Diyaarso aagga baaritaankaaga oo hubi waxa ku jira qalabkaaga baaritaanka	Bogga 6
2	Diyaari baaritaankaaga	Bogga 8
3	Qaado muunadaada suufka ah	Bogga 10
4	Ka shaqeey muunadaada suufka ah	Bogga 12
5	Akhri natiijadaada	Bogga 14
6	Ka warbixi natiijadaada	Bogga 15
7	Si ammaan ah u tuur qalabkaaga baaritaanka	Bogga 17

**Ku keydi qalabka baaritaanka heerkulka qolka ama meel qabow oo qallalan (2°C ilaa 30°C). Ha uga tagin qorraxda tooska ah hana ku keydin tallaajad ama barafeeyaha.**

Qalabkan waa in loo isticmaalaa heerkulka qolka (15°C ilaa 30°C). Haddii qalabkan lagu keydiyay meel qabow (wax ka yar 15°C), ku dhaaf heerkulka qolka caadiga ah 30 daqiiqo ka hor intaadan isticmaalin.

**Ka fogee qalabka baaritaanka carruurta.**

# 1. Diyaarso aagga baaritaankaaga oo hubi waxa ku jira qalabkaaga baaritaanka




Ha cunin hana cabin ugu yaraan 30 daqiiqo ka hor baaritaanka si aad u yareyso halista in baaritaanka uu xumaado.



Waxaad u baahan doontaa: saacad (ama saacad darbiga), istiraashooyin, muraayad iyo gacmo nadiifiyaha ama saabuun iyo biyo diirran.

1



Si taxaddar leh u akhri hagahan tilmaamaha.

Eeg sida loo qaato baaritaanka suufka adigoo si toos ah fiidyow ka daawanaya:

[www.gov.uk/covid19-self-test-help](http://www.gov.uk/covid19-self-test-help)

2



Baneey, nadiifi oo qalaji meel sagxad oo siman isla markiiba ka hor inta aadan bilaabin baaritaanka.

3




Si fiican u dhaq gacmahaaga 20 ilbiriqsi, adoo isticmaalaya saabuun iyo biyo diirran, ama gacmo nadiifiyaha. Tani waa si aadan u wasakhaynin qalabka baaritaanka. Hada qallaji gacmahaaga.


Haddii aad sameyneyso wax ka badan hal baaritaan, nadiifi sagxada sare oo mar kale dhaq gacmahaaga inta u dhexeysa baaritaan kasta.

4

Eeg waxyaabaha kujira qalabka baaritaanka. Hubso inaysan waxba ka xumayn ama jabin.



Caagada baaritaanka oo xiran




Suuf oo kujira bac xiran




Extraction buffer sachet (bacda loogu talagalay keydinta muunada)



Extraction tube (tuubada loogu talagalay qaadista muunada)



Caagad loogu talagalay in lagu hayo tuubada muunada (ku rakiban kartoona)



Bac qashinka



Ha isticmaalin caagada baaritaanka haddii bacda ay ku xirnayd ay waxyeello gaartay.


**Wax jaban, waxyeello gaartay ama maqan?** Haddii aad aragto wax jabay, waxyeello gaartay, wax ka maqan ama ay adag tahay in lagu isticmaalo qalabka, **ha isticmaalin**. Haddii aad rabto inaad jawaab ka bixiso arrintan fadlan wac xarunta xiriirka macaamiisha. Khadadku way furan yihiin maalin kasta, 7 subaxnimo ilaa 11 habeenimo.

- England, Wales, Northern Ireland: **119** (lacag la'aan u ah telefoonnada gacanta iyo telefoonnada guriga)
- Scotland: **0300 303 2713** (lagugu soo dallacayaa qiimahaaga caadiga ah ee shabakadda)

Haddii lagu dhaawacay ama falcelin kugu yeelatay adoo isticmaalaya xirmadan, ka sheeg Coronavirus Yellow Card Reporting Site: <https://coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk>

## 2. Diyaari baaritaankaaga

5



Caagada baaritaanka ka soo saar baakada xiran kadib saar sagxad siman oo nadiif ah. Marka la furo, ku bilaw baaritaanka 30 daqiiqo gudahood.



Bacda qalalan ee gudaha iyo baakada si ammaan ah ugu tuur qashinka gurigaaga.

6



Si taxaddar leh u marooji ama wareeji si aad u furto bacda. Ka fogey wajigaaga markaad furayso oo ka taxaddar inaad daadin wax dareere ah.


7



Fur tuubada muunada oo si tartiib ah tuubada ku tuuji dhammaan dareeraha ku jira bacda. Iska ilaali inaad tuubada ku taabato bacda.

Bacda muunada ku rid bacda qashinka ee lagu siiyay.

8



Saar tuubada la buuxiyay haynta tuubada muunada (ku rakiban kartoona gudihiisa) si looga ilaaliyo daadinta dareeraha.

Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa koob yar si aad u dhex dhigto tuubada.



9



**Si tartiib tartiib ah sankaa ku duufso istiraasho oo ku tuur qashinka gurigaaga. Haddii aad baaraysid cunug ka caawi duufsashada.** Tani waa si aad uga takhalusto duuf fara badan.


10



**Mar labaad gacmahaaga si fiican ugu dhaq 20 ilbiriqsi adoo isticmaalaya saabuun iyo biyo diirran (ama isticmaal nadiifiye).**

Haddii aad qof kale ku samaynayso baaritaankan, labada qof waa inay dib u dhaqaan ama nadiifiyaan gacmahooda.

11




Caarad jilicsan

Gacanka

**Ka raadi suufka bacda xiran ee hortaada taalla.** Ogow caarada, jilicsan ee marada suufka.

12



**Fiiq si aad u furtid baakada suufka ah markaad diyaar u tahay isticmaalka oo si tartiib ah u soo bixi suufka.** Waxaa tani ugu isticmaali doontaa cunaha iyo sankaba.



**Marnaba gacmahaaga haku taaban caarada jilicsan ee suufka.**

### 3. Qaado muunadaada suufka ah



Qaybta hore ee suufka ha ku taaban carrabka, ilkaha, dhabannada, ciridka, ama meel kale. Haddii ay taabato wax kale, waxay xumayn kartaa muunadaada.

Marnaba gacmahaaga ha ku taaban caarada marada.

Qaadashada muunada waxay sababi kartaa saxasho iyo raaxo la'aan yar, laakiin waa inaysan xanuun keenin.


**Haddii aad baaritaan ka qaadayso ilme ka yar 12 jir, ama qof u baahan gargaar, raac tallaabooyinka ku yaalla bogga 11**

13



Adiga oo suufka ku haya farahaaga, afkaaga aad u kala qaad oo ku xoq caaradda suufka ah labada quman (ama meeshii ay ahaan jireen). Sidaan samay 4 jeer oo xoog leh dhinac kasta (isticmaal toosh ama muraayad si ay kaaga caawiso inaad sidan sameyso). Si taxaddar leh uga saar suufka qaybta dambe ee cunahaaga.

14



Isla suufka si tartiib ah gali 1 san gudhiisa illaa aad yara dhibsato (qiyaastii 2.5 sentimitar sankaaaga gudhiisa).

**Si xoog leh suufka ku wareeji sankaa gudhiisa, adigoo sameynaya 10 wareeg oo dhammaystiran.**

**Tani waxay keeni kartaa raaxo la'aan. Ha sii gelin suufka gudaha haddii aad yara dhibsanayso ama aad dareemayso xanuun.**


# Baaritaanka ilmaha

**Carruurta 12 jir ka yar waa inuu baaraa qof weyn.** Raac hagaha hoose ee ku saabsan sida loo diyaariyo loona baaro ilmaha. Waxaad muuqaal sharraxadda ka daawan kartaa [www.gov.uk/covid19-self-test-help](http://www.gov.uk/covid19-self-test-help)

Tus ilmahaaga qalabka baaritaanka oo ugala hadal waxaad samayn rabto. Haddii ay suurtagal tahay, ku fadhiisi qof kale dhabtiisa ama qof ha qabto gacantiisa.

Weydii cunuga inuu ku duufsado oo ku qufaco waraq istiraasho. Istiraashada ku tuur qashin-qub xiran. Weydii ilmaha inuu furo afkiisa inta ay kari karaan oo dhahaan 'Ahhhh' (tani waxay sahlaysaa in qumanka si sahlan loo arko) ilaa iyo inta ay awoodaan inta aad suufka ku xoqaysid qumankooda (ama halka qumankooda ay ahaan jireen haddii laga saaray).


13



x4

**Suufka gacanta ku hay, weydii cunuga inuu aad u kala qaado afkooda oo uu madaxiisa dib u janjeero. Si tartiib ah ku xoq caarada marada ee suufka labada quman dushooda (ama meeshii ay ahaan jireen). Sidaan samay 4 jeer oo xoog leh dhinac kasta. Si taxaddar leh ka saar suufka.**

14



x10

**Isla suufka afkiisa hore si tartiib ah u gali 1 duleelka sankooda ilaa ay xoogaa dhabsadaan. Si xoog leh suufka ku wareeji sanku gudahiisa, adigoo sameynaya 10 wareeg oo dhammaystiran oo si tartiib ah uga saar.**

**Haddii aadan suufka marinin qumanka, suufka mari labada duleel ee sanku, adigoo duleel kasta ee sanku ku sameynayaa 10 wareeg.**

Waxaad ka heli kartaa talo dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19 carruurta: [www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/symptoms/coronavirus-in-children/](http://www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/symptoms/coronavirus-in-children/)

## 4. Ka shaqey muunada suufka ah


15



Soo qaado tuubbada muunada oo saar caarada marada ee suufka tuubbada muunada si ay ku jirto dareeraha.

**Xoog ku riix cirifka tuubbada muunada, adigoo ku wareejinaya tubbada 15 ilbiriqsi. Kani waa sida muunadaada lagu wareejiyo dareeraha.**


16



Tuubada ku qabo suufka inta aad ka saareyso. Hubi in dareeraha oo dhan laga saaray caarada jilicsan ee suufka.

Gali suufka bacda qashinka caagga ah ee lagu siiyay.

17



Si adag ugu riix daboolka tuubada muunada si looga hortago daadin.

18



Si tartiib ah u tuuji tuubbada muunada si aad ugu dhibcisid 2 dhibcood oo dheecaanka ah caagada muunada (S) ee caagada baaritaanka.


Hubso inaad dhibcinaysid dareere oo aadan sii daynayn xumbo hawo ah.

Ku rid tuubbada muunada bacda qashinka iyadoo uu la socdo suufka.



**Hubso inaad caagada baaritaanka dhigto meel siman. Ha dhaqaajin caagga inta baaritaanka socdo.**

19



**Hubi wakhtiga oo saacad ku xir haddii aad mid leedahay. Sug 30 daqiiqo kahor intaadan akhrin natiijadaada.**

**Sugida wakhtiga baaritaanka buuxa ee 30-ka daqiiqo kahor intaadan akhrin natiijadaada aad bey muhiim u tahay.**

Natiijo helidda cudurka way soo bixi kartaa wakhti kasta 20 daqiiqo ka dib, hase yeeshe waa inaad sugtaa 30ka daqiiqo oo dhan si aad u diiwaangeliso natiijo taban maadaama dillinta baaritaanka (T) uu ku qaadan karo muddo dheer inuu soo baxo.

Bogga xiga ka raadi sida loo akhriyo loogana warbixiyo natiijadaada.

# 5. Akhri natiijadaada

Waxaad arki doontaa dillinta xakamaynta (C) oo bilaabaya inuu soo muuqdo 4 daqiiqo kadib. Waa inaad sugtaa 30 daqiiqo kahor intaa aan natiijadaadu diyaar garoobin.



Ha uga tagin baaritaanka in ay qaadata in ka badan 30 daqiiqo sababto ah tani waxay ka dhigeysaa natiijada mid aan sax ahayn.



## Natiijada taban

Hal dilliin ku xiga C waxay caddaynaysaa in baaritaanka ay tahay mid taban.



## Natiijada helidda cudurka

Laba dilliin, mid ku xigta C iyo mid ku xigta T, xitaa khadadka daciifka ah, waxay muujinayaan in baaritaanka laga helay cudurka. Waa in aad NHS u gudbisaa natiijada baaritaankan, fadlan eeg **bogga 15** ee lagu talagalay hagista qaabka loo sameeyo tan.



Haddii natiijada baaritaankaagu laga helay cudurka, adiga iyo qoyskaagaba waa inaad is-go'doomisaan idinkoo raacaya tilmaamaha Dawladda.



## Natiijo aan sax ahayn


Haddii aan jirin dilliin ama hal dillin ku xiga T waxay caddaynaysaa in baaritaanka aysan saxsanayn.

**Ka warbixi natiijadaada si aad u hesho hagitaanka aad u baahan tahay inaad raacdo (eeg bogga 15).**

## 6. Ka warbixi natiijadaada

### Waa in aad natiijadaada u gudbisaa NHS.

Gudbi natiijadaada si NHS-ta ay ula socoto faafida cudurka, u taageerto bulshadaha UK oo dhan, ula dagaallanto fayraska una badbaadiso nolosha. Waxaad sidoo kale wax badan ka ogaan kartaa natiijada iyo waxaad u baahan tahay inaad sameyso.




Koodhka QR

**Waxaad u baahantahay koodhka QR, ama nambarka aqoonsiga ee hoostiisa, qeybta baaritaanka si aad uga warbixiso natiijadaada.**



**Internetka ku gudbi** (ugu dhakhso badan)

Booqo: [www.gov.uk/report-covid19-result](http://www.gov.uk/report-covid19-result)



Ama **telefoon ahaan u gudbi**

Wicitaanadu way furan yihiin maalin kasta, 7 subaxnimo ilaa 11 habeenimo.

England, Wales iyo Northern Ireland: **119**  
(Iacag la'aan u ah telefoonnada gacanta iyo telefoonnada guriga)

Scotland: **0300 303 2713**

(Iagugu soo dallacayaa qiimahaaga caadiga ah ee shabakadda)

# Natijoooyinkaaga waxay uga dhigan yihiin

## Natijada helidda cudurka

Haddii aad hesho **natijada helidda cudurka**, waxay ka dhigan tahay in aad qabtid coronavirus waxaadna halis ugu jirtaa in aad dad kale qaadsiiiso. Markii aad gudbinayso natijadaada, waxaa lagu siin doonaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan tallaabooyinka xiga ee aad qaadi doonto.

Fadlan ogow, natijadaada waxaa lagu qeexi doonaa natijada LFD (Lateral Flow Device) ee farriin qoraal aad heli doontaa.



**Adiga, qofkasta oo kula nool, iyo qofkasta oo kugu dhow, waa inuu is-go'doomiyaa sida wafaaqsan xeerarka hada jira ee heer qaran iyo kuwa deegaanka, kaas oo laga heli karo [www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/](http://www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/)**

## Natijada taban

Haddii aad hesho **natijada taban**, waxay u badan tahay in aadan cudurka qaadsiiin karin xiliga la qaadayay baaritaanka. Natijada taban ee baaritaanka, hase yeeshee, ma dammaanad qaadayso in aadan lahayn coronavirus.

Haddii aanan lagaa helin cudurka, waa **in aad** sii waddaa hogaansanaanta xeerarka qaranka iyo kuwa deegaanka iyo tilmaamaha oo ay ka mid yihiin gacmo dhaqashada joogtada ah, kala fogeynta bulshada iyo xirashada maaskarada, meesha loo baahan yahay.

Haddii aad isku aragto calaamado heerkul sarreeya, qufac cusub, isdaba-joog ah ama lumid ama isbeddel ku timaada dareenkaaga dhadhanka ama urta adiga iyo reerkaaguba waa inaad is-go'doomisaan oo aad baaritaan kale ka heshaan [www.gov.uk/get-coronavirus-test](http://www.gov.uk/get-coronavirus-test) ama adigoo wacaya xarunta xiriirka macaamiisha. Wicitaanadu way furan yihiin maalin kasta, 7 subaxnimo ilaa 11 habeenimo.

- England, Wales, Northern Ireland: **119** (lacag la'aan u ah telefoonnada gacanta iyo telefoonnada guriga)
- Scotland: **0300 303 2713** (lagugu soo dallacayaa qiimahaaga caadiga ah ee shabakadda)



## Natiijada aan sax ahayn

Haddii aad hesho **natiijo aan sax ahayn**, taas macnaheedu waxaa weeye baaritaanka si sax ah looma qaadin. Waxaad u baahan tahay inaad qaadato baaritaan kale. Adeegso xirmo cusub oo baaritaanka, laakiin dib ha uga isticmaalin xirmada hore.

Haddii aadan haysan baaritaan kale, waxaad qaadan kartaa nooc kale ee baaritaan adigoo adeegsanaya barnaamijka NHS COVID-19, ama adigoo booqanaya [www.gov.uk/get-coronavirus-test](https://www.gov.uk/get-coronavirus-test) ama adigoo wacaya xarunta xiriirka macaamiisha. Wicitaanadu way furan yihiin maalin kasta, 7 subaxnimo ilaa 11 habeenimo.

- England, Wales, Northern Ireland: **119** (lacag la'aan u ah telefoonnada gacanta iyo telefoonnada guriga)
- Scotland: **0300 303 2713** (lagugu soo dallacayaa qiimahaaga caadiga ah ee shabakadda)

## Waxqabadka baaritaanka

**Baaritaanku waxay u badan tahay in ay soo saarto helidda cudurka haddii uu qofka leeyahay heerar coronavirus oo sareeyaa (COVID-19).**

Tani waxay ka dhigan tahay inay u badan tahay in la ogaado dadka hadda cudurka faafin kara oo u baahan in isla markiiba ay is-karantiilaan.

## 7. Si ammaan ah u tuur qalabkaaga baaritaanka

Baaritaankaagu markuu dhammaado, **ku rid dhammaan waxyaabaha kujira qalabka baaritaanka bacda qashinka ee lagu siiyay**. Ku rid qashinkaaga guud ee guriga.

# Qoraal ka samay natiijooyinka baaritaankaaga

Tan waxaa loogu talagalay xasuustada. Waa inaad wali u soo sheegtaa natiijadaada NHS (wixii macluumaad ah eeg bogga 15).

Yaa qaadday baaritaanka	Taariikh	Wakhtiga	Natiijada baaritaanka

# Qalabkaaga waxay ka kooban tahay agabyadan soo socda

Walxaha	3-Pack	7-Pack
Tilmaamaha isticmaalka (dukumeentigan)	1	1
Haynta tuubada muunada	1	1
Caagadaha baaritaanka oo kujira baakada xiran	3	7
Bacaha baaritaanka oo xiran	3	7
Tuubooyinka muunada	3	7
Suufafka kujira bacaha oo xiran	3	7
Bacaha qashinka	3	7

Bixinta qalabkan waxaa kaliya loo ogol yahay inay qayb ka tahay hawlgalinta DHSC ee hoos timaada barnaamijka NHS Test and Trace.



**Soo-saaraha:** (Waxda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada) Department of Health and Social Care, 39 Victoria Street, Westminster, London, SW1 0EU.

**Waxaa ku soo saaray qandaraaska DHSC:** Xiamen Biotime Biotechnology Co Ltd, 2F/3F/4F, No. 188, Pingcheng South Road, Haicang Street, Haicang District, Xiamen, Fujian, 361026, P. R. China.

### Tusmada astaamaha



Ku kaydi  
2 – 30°C



Lagu nadiifiyay  
ethylene oxide



Soo-saaraha



Ha isticmaalin  
badeecada  
marka xirmadu  
ay waxyello  
gaartay



Nambarka  
xirmada



Taariikhda uu  
dhacayo



Aaladda ogaanshaha  
caafimaadka ee In vitro



Ka ilaali  
qoraxda



Taariikhda  
soo-saarista



Dib ha u  
isticmaalin



Digniin,  
fadlan tixraac  
tilmaamaha



Meel qalalan  
dhig



La tasho  
tilmaamaha  
isticmaalka

Dhammaan macluumaadka iyo sawirrada ku jira dukumentigan waa sax ilaa 15ka Janaayo 2021.

Nooca 1.3.1